



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA LUUYO 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Luulyo 2023 ayaa gaaray 144.89, marka la barbardhigo 143.72 bishii Juun 2023.

Isbedel bileedka, Luulyo 2023, marka la barbar dhigo Juun 2023, ayaa sare u kacay 0.82 boqolkiiba. Sare u kaca billaha ee ugu badan ayaa ahaa **Isgaarsiinta (11.13 boqolkiiba)**. Sare u kaca ugu badan ee Isgaarsiinta ayaa ka dhashay qiimaha **Telefoonada iyo qalabka Telefax (+16.00 boqolkiiba)**. (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Luulyo 2022 iyo Luulyo 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.98 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.64 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Juun 2022 iyo Juun 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Luulyo 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Luulyo 2023	
Tusaha bishan (Luulyo 2023)	144.89
Tusaha bishii hore (Juun 2023)	143.72
Tusaha sanadkii hore (Luulyo 2022)	136.71
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.82%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.98%

Heerka sicirbararka marka loo eego TSB-da

isbedelka boqolayda ee 12 kii bilood

TSD-da tixraca

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Luulyo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Luulyo 2023

Heerka sicir-bararka bisha Luulyo 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Juun 2022 iyo Luulyo 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.98 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Luulyo 2022 iyo Luulyo 2023, marka la barbar dhigo 6.64 boqolkiiba 12kii bilood, Juun 2022 iyo Juun 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Luulyo 2023 ayaa sare u kacay 0.82 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Luulyo 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada**, **guryaha, biyaha**, **korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 0.37 boqolkiiba, bishii Luulyo 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.52 boqolkiiba bishii Juun 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.19 boqolkiiba bishii Luulyo 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 0.36 boqolkiiba Juun 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -0.40 boqolkiiba Luulyo 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey sare u kac dhan 15.85 boqolkiiba Luulyo 2022. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 16.41 boqolkiiba ee Juun 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da iyo qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Luulyo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Luulyo 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):


- **Isgaarsiinta** ayaa la diiwan galiyey sare u kac sanadle ah 26.27 boqolkolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+40.17 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 15.85 boqolkolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, gaaska & shidaalka (+21.31 boqolkiiba). Tani ayaa timid qiimaha shidaalka oo sare u kacay awgeed +44.00 boqolkiiba.
- **Cafimaadka** ayaa laga diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 10.56 boqolkiiba, bishii Luulyo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+19.81 boqolkolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.70 boqolkolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha adeega Gaadiidka (+32.36 boqolkiiba). Sae u kaca waxaa ka yimid rakaabka gawaarida dhulka ku safra (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 8.34 boqolkiiba Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+8.91 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.81 boqolkiiba Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa ka qayb qaatay qiimaha lagu barto Dugsiyada sare (+28.26 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 6.91 boqolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+10.96 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac dhan 6.42 boqolkiiba Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Qalabka Dhalada, Miisaska & Maacuunta Guryaha (+13.79 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac gaaraya 6.21 boqolkiiba Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+11.54 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Dumarka (+33.87 boqolkiiba)

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Luulyo 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Luulyo.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Luulyo 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Luulyo 2023 (+)

- **Isgaarsiinta** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac bille ah 11.13 boqolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (16.00 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac bille ah oo gaaraya 7.81 boqolkiiba Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa ka qayb qaatay qiimaha lagu barto Dugsiyada sare (28.26 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 4.77 boqolkiiba Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (11.72 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 3.20 boqolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiima hoteelada (4.97 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac bille ah oo gaaraya 2.73 boqolkiiba bishii Luulyo 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka gaar ahaan Miiraha. 🇧🇩

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Luulyo 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Luulyo.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Luulyo 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Luulyo 2022 TSB	Juun 2022 TSB	Luulyo 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha TSB	100.00	136.71	143.72	144.89	0.82	5.98
Cuntada & Cabitaanada	46.04	151.90	149.54	150.10	0.37	-1.19
Tubaakadda	1.25	82.02	162.88	167.33	2.73	104.02
Dharka & Kabaha	5.03	159.56	168.14	169.47	0.79	6.21
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	120.18	139.78	139.23	-0.40	15.85
Agabka Guryaha	2.93	109.53	116.56	116.56	0.00	6.42
Caafimaadka	5.00	161.16	178.18	178.18	0.00	10.56
Gaadiidka	3.77	110.57	121.22	121.29	0.06	9.70
Isgaarsiinta	2.80	103.03	117.07	130.10	11.13	26.27
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	109.11	116.95	7.18	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	140.72	145.78	150.45	3.20	6.91
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.27	114.03	119.47	4.77	8.34

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Luulyo, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Agoosto, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Luulyo 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Luulyo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia